# Cad Waraaqa Uun

A. M. Yusuf | wayeel@operamail.com

---

Cibaarooyin badan baa socdoo ciilay ubadkiiye...
Caynaanka kuwa noo hayee ceebta ina saaray
Nimankaas cawaanka ah haddaan Eebbe cidhibgoynin
Ma calaacal baa ii bogsiin uurka cabanaaya.

(*Faarax Maxamuud*: Caloolyow)

---

**MAADI KOLONGA OBBO**, fannaankii jiitay ee reer Kismaayo; wiilkiisii ahaa Nameka, wiil uu sii dhalay (u garo curadkii Nameka ina Maadi Kolonga Obbo); haatan se lagu magacaabo Obbo Mkoma, ayaa laba toddobaad kahor *meesha* gaari ku dhaafay; waxa uu na ku sii jeeday abbaartii *Banhof*-ka, halkaas oo uu ka sii raaci lahaa tareenka *Inter-City Express (ICE)*; si dabadeed na *Frankfurtflughaven* uu uga sii duulo xaggaas iyo *Kapstadt*, Koonfur Afrika. Ujeeddoda dhoofkiisa ayaa ba ahayd in magaaloda *Cape Town* uu ku soo qaato tababar duuliyenimo. Jiif, cunto, iyo weliba saacado duullimaad oo faro badan iyo *fee* (kiro) ka jaban qiimoha *Alemania*.

Ha maqnaan lahaayaa: maxaa qiil uu u ciirsado u noqon lahaa? Cudurdaar sidee kale ah ayuu se sharafkiisii la madoobeeyay ku caddeysan kari lahaa?

.

.

.

Meeshu waa magaalo la yiraahdo Braunau, ka na tirsan gobolka *Klagenberg*, *Alemania*. Carruur caddaan ah ayaa waddo kasta ba joogta; kooxo ayaa se kubbadda cagta ku ciyaaraya gego, digdigo balse ah xadiidin, goob ciyaareed lagu magacaabo *Spielspange*. Ciyaalkan qalaad, agfadhigoodii badnaa ee kombiyuutarka, ruuqiddoodii macmacaanka, rudmodoodii baradhoda xalleefsan, iyo ciyaarohii kombiyuutarka ayaa loo eersadaa cayilkan *qabkoodii* dhalandooriyay, u na yeelay qaab aad u foolxun: calool dibbirsan, caman kuuskuusan, iyo cajarro diilan. Meesha waxa ku maageeran hooyooyin iyo aabbeyaal kala taagersan, oo kala dhiirrigelin, u na kala orin kolka ubadkoodii uu cagta ba la haleelo kubbad, sidiisa oo kale ba, aad u buufsan. [ *Sacab*. *jawjaw*. *Dhulgariir*! ]

Aalaaba, *meesha*, reerku waxa uu ka kooban yahay lammaane isla-nool uun. Illayse, si loogu garto sida ugu qeexan; waa labood iyo labood ama dhaddig iyo dhaddig isu dhaxa. Nimow-Naagyo ama isqaba amabase *isu-fuula*. Laga yaabee, in aad horey maqashay, '*Heblaayo gaal bay u fuushaa*!'; tiiyoo looga jeedo, '*gaal aan qabin ayay u naag tahay*'. Ereygan, fuulitaan, codsi, ha u fahmin si intaas ka sii macsi duwan. Haah! Xeerka ayaa u dulqaadanaya in '*labadii is-jecel*' ba ay is guursan; haddii kale na, ay ba isu-fuuli karaan. Hayeeshee, immika, geddii hooyooyinkii Soomaalida ba, maro taarashyo leh, subeeci oo kale, ayay ku xambaarsan yihiin dhallaan kale ee yaryar; lammaaneha qaarkood se waxa ay ba gacanta hayaan ilmo ordi karaya, ka na firfircooni badan bucbucyodooda ka cagajiidaya dheesha ay daawanyaan ba.

Funaanado holof ah, surwaal-dabagaabyo dalfac ah, kabo aan sina ba uga yareyn buudka ay illodaan *neo-Nazi skinheads*-ka, ayay gebigood wada xiran yihiin. Gibilkooda cardiifka cad waxa ku asalan amba ku shaqlan midabboda calankooda: huruud, gaduud, iyo madow. Olol baxaya. Eeg haddana! Gololoda dalkooda ayaa

shafka ugu wada tolan. Maleha, waxa ay iyaga ku barbaarin han gurracan, mid ku sii qiireyn guhaad aan dhab loo arkeyn, iyo haybsooc u aloosan dab hoos ka nool oo kale. Tusaale ahaan, marka loo eego, ku-qaadistoodii Heesta Qaranka Alemania: *tixo ka faafreebanaa* maansodii *Heinrich Hoffmann von Fallersleben*, *tuducyodaas baas* ayaa weli, mindhaa, hoojisyo qab weyn iyaga maanka kaga wada dhex shidi:

*"Deutschland, Deutschland, über alles…"*

Badankoodu waxa ay u dhaqaaqayaan; may, badankoodu waxa ay u buluqbuluqleynayaan sidii wanan shilis ah. Midkoodii *dhaco* se; geddii doofaar la gowracay ayuu u gebidhacleyn; midkoodii dhacsaal awgeed meel u habsoda se; xagga muuqa waxba kagama duwana *fuur* yaalla *Waddodii Nasiib Buundo*. Dadyowgii Soomaaliya, l*ooma-ooyaankii*, galladda qudha ee iyaga na lagu ba cawriyo ayaa loo muhan:

*"Wiil geeljiroon gaajadu kareyn…" (Hees: Gobannimodayada Guullow Adkee)*

Goorta halyeyga macluulan uu *dhaco* se; sida ay calooshiisu u qombobsan tahay, ayaa la arkayaa *dhoobbigii* uu diihaalku dilooday, *halgamaagii*: mase waa isla kiiyoo ciyoon ba naaxi! oo yeelan baacug hingilan. Caloolxumo weyn. Waa *diiq*, *diiq*, *diiq* isaga uun u gaar ah. Hamuuntirkii aakhirutahan, u ahaa na; yaa og? Tolow, saansaanta nolol kale ee noloshii hore u dhaanta, miyaa haddaa? Ogow, Soomaaligu waa sankunneefleha qudha, kaas oo geeri mooyee aan ay noloshu ba kobcin. Alemania, qurbe oo idil, waa meel loogu talogalay dhaqankii awoweyaal in lagu mooradduugo. Dhaqan la'aani waa hayb la'aan. Haybad la'aan. Han la'aan. Walaal la'aan. Muu iska dhinto, haddaa. War muu nafta mar uun huro. Geeljirku weligii xornimo ayuu horeyba ugu soo naalloon jiray. Waryaa, joog dalkaaga. Ku dhimo; u na dhimo dalkaaga. Dhan loo dayo ba, la ogaa'; geeljirka geerida ayaa u roon.

Geeljirka hallowsanow, doqonkaas habowsanow, geesiga ciishooday ee Alle kala walaal dhigay '*Qarankii Abwaannoda*', ereyodiisii ku qiirow:

*Dhallintii geddoon baa ku dhacay aan la garanayne*
*Gabaahiir ayey kuududaan garasho waa yaabe*
*Gashi bay ku noolyiin dhamaan waanu gudhayaaye*
*Gacan hoorsigay qaayibeen waa gunnimo weyne*
*Qof xawaalad garab taaganoo giniyo eegaaya*
*Oon guunyo deeqdiyo lahayn guri wax hoos yaala*
*Gunno raadi mooyee dad aan ceeb ka gubanaynin*
*Oo gargaar shisheeyiyo ku nool faraha guudkooda*
*Oo gadaan wax loo saarayoo lagu gumaynaayo*
*Gasariirka ina haysta baan gocanayaa mooyi!*

*(Suleiman Jama Hersi: Wereg Weere)*

.
.
.

Mwanamvua Kasamila, haatan waxa loogu yeeraa *Frau* Obbo; *bilis* u ah raalliyo sida Soomaaliyad dhalad ah; iyadu na waa Obbo Mkomo hooyodiis. *Saaddambe*, haayoo *berridambe* oo kale, ayaa wiilkeedii ka soo laaban lahaa ~~dalkii *Apartheid*~~; yac! qalinka, iyo hafyo-badanidiisa; *South Afrika*. Cuntooyinkii ay ku soo dhoweyn lahayd, ayay ku mashquulsanayd. Walow ay iska xanuunsanayd, si hilow badan ayay misana u raagsanaysay goorta ay markale arki lahayd ubaxeedii. Nuurkii idhaheeda. Madigeedii. Waxa ay ku hawlanayd sammeynta doolshooyin, rooti, buryoosh, bur-kaaki, buskud, sambuusi, bejiye, muufo-baraawe, oodkac, hariiso, iyo dhigaallo kale oo ay ka kororsatay Muslimiinta reer Braunau. Si kale kuma taqaannid; ee haddii aad geli lahayd jikada ay wax ku karinaysay, dhareer ayaa afkaaga ka soo quban lahaa: Udugga bun la dubay, qorfo iyo heyl la tumay; sanuunta burunji lagu kariyay basal, toon, riixaan, kaamuun, filfil, basbaas-cagaar, xawaaji-gaduud,… hilbo wada dhireysanaa. Xaggaas dambe na, burjiko (dhardhaarro korontonteysanaa), waxa ka dul hongod lehaa heemaalkii Frau Obbo, kaas oo ay finiinacyo dhidid ahaa ay kaga sammeysmeen wejiga, kakor bar suujuud

awgeed la gommodontay; dhibco, sitaahoo ay ahaayeen *huur isu oomanaa*, Niilkii Waqooyi iyo Niilkii Koonfureed, dabadeed goorta geeddiyaal dhafoorkeedii ka mid ahaa ay isu soo jiidhaan, isku darsoomayay; oo isku wada noqonayay na hal dareer oo harag qudha wadaagayay, kaas oo misana hoos ugu sii durdurayay cabbaadkeedii qaar-shareernaa… tiiyo, iyadu na, masar cad hadba intaa iskaga tirtiraysay; si dhididkeedu aan uu ugu dul tifiqleyn cuntodii ay hagaaji lahayd ba. Gaarinnimo.

Teeryo waagii lala aqalgalay, laga soo billaabo noloshii ay horey ula soo wadaagi jirtay hartigii iyada u hor-shaashiyay (hor aroosay); hawshan guri waa shaqo maalin kasta ba, si joogto ahayd, ay u soo fulin jirtay cibaadaysi oo kale. *Herr* Obbo, jacaylkeedii rumaad, gacalodiisa bilaash uguma neenaasin -- ‘*Malaa’ika*’.

Fiidadkii goorta uu ganacsigii irdoha u soo laabo; maxaa loo maleyn daraadda, qaraami murwaad badan uu iyada ugu qaado? Erayodii ina *Halima Wughanga* iyo *Ramadhan Mwamburi*, illinka marka uu soo dhaafo, inta garkiisa cad hangool oo kale garabkeeda u dul surto, sababta uu iyada ugula haanyoon:

> *Malaika, nakupenda Malaika.*
> *Malaika, nakupenda Malaika…*
> (*Fadhili Williams Mdawida*: *Nakupenda Malaika*)

Yaa sheegi karaya se, axad loogu heesayo, ‘*waa aan ku jeclahay*’; sababta uu isagu na u ooyn? Mwanamvua ina’ Kasamila, *Frau* Obbo, waayo ay u ooynaysaa? Goorahaas, iyadu na, Ilaaheeda Weyn ayay si qushuuc leh uga shukrin: in jacelkeedii isaga oo nabad ah uu reerkii ku soo celiyay. Oohin, haa; jacayl na, haah. Waa se jacayl ay ku cibaadeysan. Mahacelin. Allaah Ayaa Mahad Leh.

Jabaqda, dananka, jiibka, gurbaanka, dafka, foorida, kitaarada, luuqda, bulleynta (sidii sengeyaal tababaran oo kaleeto; isu-rog-rogitaanka, si gaw ah, goorta ay ku haabboon tahay, lug ama addin ama madax ba, korkiisa oo idil, xubin ba geesteed, uu hadba uga kala faranfardeyn) iyo codkiisii; qaraaxaddii Nameka *ina Maadi Kolonga Obbo*. Waxyaabohaas oo is wada biirsoday, waa caweys iskugu marmaya “*Kun Habeen iyo Kow*” oo kale: *sheeko-xiriir* saameyn ku yeelan wadane kasta ee u nugul hawloha Aadmiga; may, ee waa wadane kasta ee u nugul DHAQANKA SOOMAALIDA. Iyaga, lammanehan liibaanay; Reer Obbo, waa u xiriir ruuxeed oo ay ku booqan xabaalo ku yaalla *Shungul Mafuula -- buddhiggii sullankoodii hore*. Halkaas, waxa ay dib u soo wada gocon: dareenno uu waqtigu iyaga laabtooda ku reebay, biligo ka mid ah hummaagohii fannaankii jiitay ee reer Majeenga, reer Kismaayo; Maadi Kolonga Obbo, kiiyoo fureyaalka *oorgan*-kiisii haddeer tobanka farood ugu dul ciyaarsiin sidii ciyaartii *Masawey;* hadhowto na sidii *Anyakow*, marka xiga na sidii *Shuulaay, iyo…* iyo *hal dhoolbir* ahaa; dhoolla-ka-qosolkiisii, kaas oo *guriga* u iftiimin; waa *ileys aan* iyaga *lacag na ugu fadhiyin*, illayn. Waa *siyaaro* noloshooda ka mid ah. Xusuus tiiranyo wadata. Laakiin se, waa baroordiiq ay haddana si uun ugu riyaaqayaan. Naalloda Adduunka.

Heestu waa u gallad yar; hayeeshee, haddana, waa oqoonsi u gaar ah; iyo hiddo iyaga kala mid dhigi, ku na xiriirn dalkoodii laga soo barakiciyay. Waa dhaqan aan weli agtoodii ka dhiman. Dalkii, iyo dadkii *Wazigua*; ama haddii si ka sii caansan ~~loo haybsooco; yac!~~ loogu abtiriyo, *Mushunguli*. *Jubbadii Hoose* oo meel dhow uga soo laaci. Nabad yididdiilo leh. Rajo joogto ah. Hadma ayaa dib loo noqon? Daltabyo. Waryaada, reer Obbo, dadnimo weynaa. Ma jaceyl ayay ba weli u hayaan? Caloolyowgii yiil Soomaaliya. Intaa se, run ahaan, waa ay oynayaan. Oohin qarsoon. Intaa na, run ahaan, waxa ay u duceynayaan Soomaalida oo idil. Ducooyin aan kala-joogsi lahayn. Billaa ‘*uurkooda cabanaya*’ uu ciyoon u fayoobaado.

Gegadii *Spielspange* -- ciyaalkii iyo cuur qiireysnaa -- oo guuraysa ayaa ag timi daafoha aqalkii *Familie* Obbo. Ereyo baas ayay reer ku inkaarayeen. Islaantii, Faru Obbo, oo u hollatay in ay duqeedii telefoon ugu sheegto bannaanbaxa gurigoodii ka ag soconayay; mase, koortii illinka ayaa loo soo garaacay. [ *Albaab-bukeyn. Canaan. Dhulgariir*! ] Degdeg ayay misana isu hagaajisay. Dabadeed

na albaabkii fag siisay. Mase! Waa *boolis* buufsan; hayeeshee, tiirkii nalka la dherer eg.

Deriska koodii xishoonayay, koodii daaqadda ama alaabku u furnaa; waa ay wada xirtay; amaba daahyodii ayuu sii deystay. Gurmad la'aan. Jaarkii ugu wada xummaan jiray, bulshodii caalamka, cawrodii adduunka, ayaa uun ba isugu soo dirwacday. Gaashaanbuurtii. Federaalkii Nimow-Naagyoda. Marka laga reebo qaxooti aan kala jeclayn waxii ku dhacaya cid kale; qaar, weliba Muslim ku-sheegyo ahaa, ayaa meel fog ka daawanayay haybsooca reer Obbo loola yimi.

In yar dabadeed kolkii eegmo dheer uu ku handaday, inta misama aamusnaantii uu jebiyay, af Alemani shigshigsanaa, kaas oo ay doobbodu na afkiisa marmar kala soo boodaysay; sida daangoda, teeda bucata, weelkii lagu dubayay ay dibadda uga duusho, ayuu weydiiyay weydiimo yaab lehaa:

"*Sie sind Frau Obbo, oder*...(Marwo Obbo ayaad tahay, mise...)?"

"Jaa. *Ich bin Frau Obbo* (Haah. Marwo Obbo ayaan ahay)."

"Arrin wiilkaaga ku saabsan ayaan u nimi."

"Iyaa? Wiilkaygii maxaa ku dhacay? Aaway? Intee?--"

Su'aalohii ay fatahday ayuu ku celiyay qeylo. Si jeesjees ka ahayd ayuu iyadii ku yiri, "Sababta la inoogu kiin soo diray ayaa ahayd ba in aan adiga ku weydiiyo meesha uu haatan ku sugan yahay *Mörder*-kii (dilaagii) aad hooyoda u ahayd."

Halkaas markii ka ogaatay in wiilkeedii uusan belo qabin, ayay ku tiri cod deggan, "Wiilkaygu ma ahan dilaa."

"Haa. Haah Faru Obbo. *Ausweiß* (aqoonsi)".

Haddiiba gadaal inta ay degdeg ugu laabatay ayay soo qaadatay boorsodeedii garabka; inta ay weli xaaggood dhex ugu soo jirtay, ayay ka soo saartay dhaafiyeheedii; markii ay soo gaartay albaabkii ay ag surnaayeen; gacanta bidix ayay ugu taagtay. Isagii na inta uu yaabay ayuu xaggeedii ula jeestay *polizitin* (boliisad) isaga la socotay, oo iyadu ciyaalkii qalaad wareysanaysay.

"*Frau Kollegin* (Marwo wadaadey) ka warran! naagtu waa *Alemani*."

"*Nur* e*in Stück Papier* (cad waraaqa uun)."

Intay ay dhabdarro kale ugu heshiin ayay ula yimaaddeen go'aan horleh, iyo weydiimo sirgaxan. Naagtii, askariyaddii, ayaa kolkaan u soo bareertay:

"Ma inoo oggolaan in aan baarno gurigaaga? Waa codsi yar, laakiin dhibaato weyn kaa baajin. Haddii kale waxa aan adeegsan doonnaa tabo kale. Haye?"

"Waxii immika ka dambeeya, idinla hadli mayo. Xeerka dalkaan waan aqaan. Haddii aad iila timmadaan *Durchsuchungsbefehl* (barwo: amarti, waraaq xeerilaaye uu ku soo oggolaan in baaris lagu sammeeyo--qof gef laga tirsanayo ama loo tirinayo--dembiile). Weydiimo kale miyaad ii qabtaan?"

"Jidka la yiraahdo *Schornsteinstraße*, gadaal dambe ka mara goob-ciyaareedda *Spielspange*, cabbaar yar kahor, qiyaastii rubi saac kahor, ayay dad reer *Alemania* ahaa arkayeen sida wiilkaaga madow u dhagax ugu shiidayay gabadh lix jirsatay -- sidii in ay ahayd Muslimad lagu arkay sariirta nin dool ahaa. Frau Obbo, adiga iyo wiilkaaga ba idin dili mayno, haddii aydnaan adinku dilka isu soo jiideyn. *Verstehen Sie? Das ist nur 'ne frank Sprache* (Ma fahmeysaa? Kani waa af hufan uun)."

Frau Obboo oo yaabkii adduunku uu u yimid ayaa mar kale weydiisay, “Ma cid baa aragtay wiikaygii? Rubi saac kahor? Yaa arkay? Xaggee joogay--”

Xayn ka mid ahayd ciyaartooydii *Spiespange*, beenaaleyaal isa soo ururrsaday, ayaa iyada weydiimaheedii maragfuryo tallantaali ahaa isu dabadhigay; iyodii na ku asqeysiiyay. Mid kasta na, si ka dhignayd maragmaddoonto oo kale, ayuu u yiri:

“Anigaa arkay!”

“Waan ka xumahay. Wiilkayga *Südafrika* (koonfur Afrika) ayuu jiraa. Hal saac kahor ayaan na taleefnka kula hadlay.”

Booliskii inta ay iyadii ka cududaarteen, ayay u sheegeen in ay ku soo laaban lahaayeen iyaga oo Xeerilaaleyeha Guud u soo jaray Barwo Baaritaan. Sidii ayay na uga wada hor tageen iridkeedii ay hor dhoobnaayeen. Iyadii na, Frau Obbo, neef weyn ayaa ka soo fuqday. Illayn waa qof dumar ahayd, misana ku soo barbaartay meel laga rumeysnaan jiray diin iyo dhaqmo kale oo isku barxanaan jiray; shaki ayay qaadday: ‘*Sidee toddobo qofood iskugu raaci karaan in ay arkeen wiilkeedii’?* Weydiimo farahaas kama badanaa, ayaa sii kiciciyay buufiskii hayn jiray, dhiigkarkii, qalalkii.... Miskiinad. Hawsheedii guriga ayay halkeedii ka sii wadatay. Telefoon ayaa looga soo diray *Polizeirevier*-ka (Iteeshinka Boliiska). Waxa lagula taliyay in wiilkeedu muddo ku siman hal usbuuc uu agtooda is-keeno; haddii kale aan la soo dhoweyn doonin cududaarka kasta ee uu boliiska ula yimaaddo; waxii muddodaas ka sii dambeeya. Iyadu na, waa ay ku raacday talodaas habboonayd.

Adigu, maxaan kuu sheegaa. Fiidkii odaygeedii, Herr Obbo, yimi; intii aan uu weli kansho ba u helin qaadistii *“Nekupenda Malaika”*; si ka duwan siyaabohii hore, caawa iyadii ayaa garkeddii sidii hankool u suratay garabkiisii weynaa; iyada oo ooynaysay ayay na u uga sheekeysay waxii is-mooggoodii dhacay. Carodii iyo ciilkii ku baxay ayuu wanooyin iyo waayaragnimo qabow kaga demiyay. Waxa ay odaygeedii ka codsatay in, cibaaroda taal, aan uu sheegin Mkomo. Waa na uu ka ballanqaaday. Waynakaas! Waa geddii lagu yiqiin. Waxa uu billaabay, tilaawooyin Qur’aan ahaa in raalliyodisii murugaysanayd uu ku dul hooriyo. Codkiisu weli waa hibo laga qadiyay ama ba la qariyay Bulshoda Caalamka Islaameed. Caadigoodii hore in u dhaqmaan ayay isku wada dayeen. Casho la’aan. Habeen wanaagsan. Hurdo caafimaad leh.

.

.

.

Dabadeed, sidii la filayay ba, Mkomo Obbo, soo laabay; looga na sheekee waxii dhacay is-mooggoodii. Dhoollo-ka-qosolkii lagu jeclaa awowgii ayaa uun ba ka soo haray. Qosol. Sidii ballantu ahayd, laba beri kadib ayuu booqday *Polizeirevier*-kii (Iteeshinkii).

Oobbigii (joornaatigii) ayuu isu sheegay in ahaa Obbo Mkomo. Saajinkii telefoon ayuu u sii diray abbaar kale. [ *War badan. Daldalan. Jawjaw. Dhulgariir*! ] Dabadeed tiro-qol ayaa cad waraaq ah loogu qoray. Jaranjaro ayuu kor u sii tafay. Meeshu qol ma ahayen. Waa fadhi sugitaan. Halkii ayuu iska fariistay illaayo intii askari kale uga imanayay, una geynay ciddi baari lahayd arrintiisa. Waxa loo geeyay nin isagu na buufsanaa; illayse aan kaftameyn, qosleyn, jixinjixen. Goon-cadaawo.

Herr Ingo ayaa yiri, “waxa lagu arkay adiga oo gabar ku shiidayay, jidka la yiraahdo *Schornstraße*. *Am Bach*. *Braunau*.”

Duuliyehii, aal askarigii inta u eegay, ayuu la la yaabay tuhumo sidaas oo kale u weyn sababta keeni kartay, iyo habdhaca codka su’aasha lagu weydiiyay.

“Anigaa? Obbo Mkomo?”

“Haa, adiga qudhaada. Yaa kalee la arki lahaa!"

“Maxaa caddeyn ah oo aad haysaa?”

“Toddobo *bürger* (muwaadin) oo adigaa kaa cadcad.”

“Ma aniga ayay i arkeen, anigaa? Ii sheeg haddaba duulkii i arkay.”

"Waa Fabian, Sebastian, Rudi, Aachim, Kai, Tilo, iyo *Herr* Zimmermann, barehaagii digsigii hoose.”

Mkomo Obbo waxa uu soo xusuustay dhacdo hadda kahor dhacday. Waa hore, isaga oo yaraa in  Herr Zimmermann suuliga dugsigii ayuu Mkomo ku dhex ceejin lahaa. Sidaas awgeed na, tii ka dhacday waa la wada ogaa. Fara-ciddiyo lehaa ayaa looga furfuray berigeedii; Herr Obbo oo Zimmermann nafta ba ka saari lahaa. Wiil yaraa, *Alemani* aan berigeedii buufsanaan jirin, ayaa taas na u sheegay aabbehiis oo qareen ahaa. Qareenkii ayaa na arrintaas si nabad ahayd ku afjaray. Qosolgariir ayuu Mkomo qoslay.

"Iyaa, wuu i arkay, macallinkaygii xumaa? Isaga ayaa i arkay aniga oo gabadh shiidayay?” Intuu cabbaar la diriray jebabkii koorkiisii, oo waraaqo isku duubnaa ka soo saaray ayuu u raaciyay, “Herr Ingo, bal haddee eeg kan waa baasaboorkii aan ku aaday, kaga na soo laabtay *Südafrika*, kanna waa tikidkii... Mooyi sidaan isla hal jeer laba meel u kala joogi karay? Diyaarad na aan *Koogur Afrika* hawadeedii u lalinayay; *Deutschland* na, aan gabar--"

Herr Ingo na, *skinhead*-kii, madaxii dhukulnaa inta uu geesoha hadba u kala ruxay; sitaahoo aan uu rumaysan karaynin caddaymohii loo hordhigay ba. Si haybsoocnimo lahayd ayuu ula sii dooday, “Ma waxaad i yeelsiin, Herr Zimmermann, bare gudeha Braunau magac wanaagsan ku leh, in uu isku kiin kahay wiil kale ee caddaa? *Alemani* iyo Afrikaan miyaa iskaga darsoomi karay? Ma saas ayaad iga raaridi lahayd: haddii aan waalanaan lahaa na?”

Duuliyehii, oo dhiilloobay, kutub Qur’aan ah ayuu jeebka kala soo baxay. Inta uu misana labodii barbar ba ka dhunkaday, ayuu ku dhaartay, si uu u muujiyo in uu beri ka ahaa eedda loo haystay.

“Allah ayuunbaa ka markhaatiya, Kitaabkan na waa Ereyodii Allaah, Run Muqaddas Ah. Herr Ingo, Isaga ayaan kuugu dhaaran: lugtayda ma geyn jidka la sheegay, ma na arag gabadh, ma na shiidin gabadh."

Herr Ingo ayaa su’aal kale weydiiyay, “Wiilka madow ee la wada arkay, ma *Teufel* (cillanaad/jin) ayuu ahaa, haddaa? Kaas adigaagan madow, xataa kuuma ekeyn, miyaa? Ma na taqaannid wiil madow ee gabadh dhalad ah kufdsay?”

Mkomo Obbo oo haddeer ay daartay caro horleh iyo cabsi uu ka qaaday in loo lebisi lahaa dembi uusan sammeyn, ayaa ku fekersanaa goortaas, tan mar haddii ba Alle ka saaro, in sida ugu dhaqseha badan uu dalkan uga tago, inta ay goori goor tahay, shaqo dambe na aan dib dambe ba ugu soo yeelan. Marka ugu horreyso se in uu waalidkiisa ka ba rarto magaaloda Braunau. Ciil daraaddiis, dhuuntii ayaa ba xirantay.

“Sidee ayay ku dhacday in beenaale been uu sheegay laga rumaysan og yahay runsheeg weliba diin iyo Alle-ka-cabsi leh. Been fiiqi sharafka iyo haragga *Alemani* madow. Alemani aan xataa haddeer adiga ba kaa ag muuqan. Dhab ahaan, ma u jeeddaa Obbo Mkomo? Hallooooo! may maqleysaa!”

Ha sheegin. Barakalaay. Dooddaas waxba uma kordhin. *Meesha* ma joogin cid warkiisa rumaysan kareysay. Herr Zimmerman iyo kooxdiisii qalaad ayaa misana la horkeenay. Midkood ba, ka kale waxii u furay, ayuu isagu na ka sii markhaati kacay uun.

Herr Ingo oo ay arrimohii iskaga yaaceen, ayaa Mkomo iska sii daayay; laakiin se uga digay in uusan magaalodan meel kale ka aadi karayn; iyo arrintan in uu kala sii tashan doono Xeerilaaliyeha Guuddi, kaas oo uu ka soo codsan lahaa: amartidii kale ee Obbo Mkomo lagu sii maraanmarin lahaa.

Caws dab la qabadsiiyay oo kale ayuu warkii qof ba qof kale sii qabadsiiyay. Warku baahi okaa! Obbo Mkomo oo gabadh shiiday ayay noqotay sheekoda magaaloda Braunau. Qofkii uu soo ag maro; ama waa qofkii isaga caayi lahaa ama shiidi lahaa ama candhuuf wejiga kaga tufi lahaa. Waxa uu goostay in aan uu cid dambe la soo qaadin arrintaas wax ku saabsanaa ba. Bes. Isaga ayaa isla hadlay,

"*Alemania zasumbua roho yangu* (*Alemania ayaa ruuxeyga murjinaysa*)."

Frau Obbo ayaa abaalkeeda loo celin; guuloha wiilkkeedu uu ka guungaaray xagga waxbarashoda. Guud ahaan, ka reer ahaan, dadaalkooda dheeriga ahaa ayaa qoyskooda u soo jiiday nacayb cillan; iyo xasad, had iyo jeer loogu soo bandhigi jiray kor-ka-hadal ahaan: Indhaha oo lagu gubo ama laga dadbo mararka caddaanka qalaad ay arrin uun uga baahdaan; baska, guud ahaan gaadiidka oo dhan, oo aan cidi soo ag fadhiisanayn xataa haddii agtooda uu fadhi ka bannaan yahay… iyo qaar kale… iqk. Wiilkeedu, meesha, kuma haysan jirin saaxiibbo dhab ahaa. Sigaar, xashhiish, iyo daroogooyinka lagu hodo ilmoha toosan, midkood na, weligii ma taaban. Ciyaalka qalaad waxa ay ugu yeeri jireen, iyaga oo isaga ku maagayay -- '*galti*', '*daayeer*' iyo magacyo kale oo aan la sheegi karin. Si kooban, hooyodiis ka soke, waa baarri uu Ilaahay toosiyay. Haddii uu ka mid ahaan lahaa kuwo qalloocan se? Hubaal, waxa uu ku dhex qurmi lahaa Xabsiga Weyn. Bal eeg! Sarwacnaanta intaas la eg: Meeshu waa meel aan wanaag iyo xummaan, midna ba, loo quurin; qofkii madow ah. Macneha, xummaantiisa na waa xummaan si uun u takooran; wanaaggiisu na waa xummaan si kale uun u xun. Afsallax-ku-dheg.

Caddaankii ay dadka kale xataa iskaga dhowaan jireen, iyagii oo iskaga dhigayay in ay ka xummaayeen sida sumcadda looga dilay, ayaa billaabay in uu bal uga sheekeeyo waxii uu kala soo kulmay rugtii booliska; si ay u ogaadaan uun dhaawaca qabkiisii la gaarsiiyay -- xaddiga uu hoos u shiiqay. Si kale kuma garatid. Garo halkii uu abwaankii Soomaaliyeed lahaa,

*"Ninkii burunji inuu iga cuno ii bariidinayay*
*Ee aan bar kale ii tarayn; beerka ka ogsooni."*

*(Xaaji Axmed Gabay-Xaddi: Beerka ka Ogsooni)*

Obbo Mkomo waxa ku billowday cudur nacayb; kaas uu u qaadayo cid kasta ee isaga ka wareysata sheekoda iyada ahayd ba. Waa uu is-koobay; geddii maroodi duqoobay, ayuu na goonni uga wada bayray raxantii *Alemania*-da caddayd.

.
.
.

Ciyoon ba ganacsigii abbehiis na waa uu xummaaday. Xanuunkii ay hooyodiis ka sii qaaday nabyodii; cudurro kale ayuu ku soo kordhiyay. Cimri-degdeg. Frau Obbo Nofeembar 11, 2007, ayay dhimatay. Haraageedii waxa loo duuliyay dalka Keenya, halkaas oo, iyada oo la tixgelinayay tartiibka duugista Islaamka lagu duugay Xabaaloha Muslimka lagu aaso ee *Kariokor*, Nayroobi.

Abrril 09, 2008 ayaa la helay mujrimkii ka dambeeyay dilkii iyo kufsigii gabadha yareyd ee reer Alemania. Herr Zimmermann! Macallinkii dugsi... Dulmanehii, xataa abbehiis, ayaa ku kari waayay in magdhow la weydiisto magalodii Braunau. Mkomo na ka diid. VITO.

"Dacwodu, nolosha miyey ku soo celin hooyodii aan u beelay? *Papa*, runto waa sidii cunto saafi ah oo weel la taal. In yar na, ha ahaato ee; ciddii kaaga masuugtay; ma cuntodii nacayb awgii ay keligeed isugu daldashay, goor dambe ay soo wada hunqaacday; ma muudalkii caddaa xaarkiisii ayaad i cunsiin lahayd? Erey dambe ha ii celin; gaar ahaan mid ku saabsan '*waraaqdii caddayd, waraaqdii*

*yareyd' ee gadaal iyo horeba laga daldalooshay*!' Mid kale na, *Papi* ma doonayo in aan sidii gudurugii ugu dul noolato hilboha meytidii yareyd. Hilbohii miskiinta yareyd. Boogo ii reysan lahaa na; haatan dib ugama sii dhiijin karo. Keliya, aabbow, noo ducee in dalkeennii Ilaahay nabad inooga wada dhigo. Soomaaliya."

Duuliye Mkomo, *curadkii ina Nameka ina Maadi Kaloonga Obbo*, haatan waxa uu u laliya shirkada dayuuradoha ee *Kuwaheri Airlines*. Isaga iyo aabbehii ba, waxa keliya oo ay weli ka haystaan dalkii qalaad, *Alemania*: waa '*laba cad oo waraaqo ah*'. Mkomo waxa uu maalgeliyay dugsi gaar ah; dugsi lagu na magacaabo *Amani na Uhuru School*. Meesha, waxa wax ka baran kara, albaabku na dherer iyo ballaadh ba ugu furan yahay: Soomaali kasta ee heeggan u ah in uu wax barto. Mushaarooyinka macallimiinta, buugaagta, iyo ficiiska kale ba -- Obbo Mkomo ayaa soo hela. Dugsi leh shahaado ay aqoonsan tahay dowladda Keenya. Xujoda kaliya ee hortaal ardaygii doonaya in uu wax ka barto: Waa Alle-ka-cabsi, salaadda, iyo dadaal waxbarasho. Jimcooyinka *Pesa* ayuu ba u qeybiyaa ardayda, kuwooda wanaagsan.

.

.

.

A. M. Yusuf | wayeel@operamail.com

Afeef: Aragtida qoraalkan waxaa leh qoraaga ku saxiixan

---

Faafin: SomaliTalk.com | July 14, 2008